

200 University Ave. E  
St. Paul, MN 55101  
651-291-2848  
800-719-4040  
(telefoon bilaa lacag ah)  
[www.gillettechildrens.org](http://www.gillettechildrens.org)

### Ila soo xidhiidh

**Su'aalo Degdeg ah**  
**Ama cabashooyin**  
Telefoonka caafimaad  
ee Kalkaalinta  
651-229-3890

### Su'aalo Kale Oo ku saabsan Daryeelkaaga

Rugta bukaanka St. Paul:  
Khadka Wicitaanka  
Kalkaalisa  
651-578-5000

Bukaanada jooga Goobaha  
Kale:

Kala xidhiidh lambarka  
Kooxdaada daryeel  
caafimaad Gillette.

**Ballamo**  
651-290-8707

### Buugaag, DVD-yo iyo kabadan

Raadi qalabka ku saabsan  
Naafada, xaaladaha caafimaad  
Iyo taageerada daryeel bixiyaha.

**Khayraadada caafimaad iyo  
Waxbarasho**  
dhismaha jaamacadda St. Paul, ee  
u dhaw dabqa afaraad skyway

**651-229-3938**

[hre@gillettechildrens.com](mailto:hre@gillettechildrens.com)

# Goynta Qumanka Kaligood ama iyaga iyo Qanjirka Adenoidka Hal Mar Qaliinka Kadib Marka Tacliimaadka Qofka La Bixinayo

## Tonsillectomy With or Without Adenoidecomy After-Surgery Discharge Instructions | Somali

waxbarashada bukaanka  
DIS038-SO

### Waxyalo ku saabsan goynta qumanka iyo xubinta adenoidka

Tonsillectomy waa qaliin lagu gooyo  
qumanka. Adenoidecomy (ad-noid-ectomē)  
waa qaliin lagu gooyo xubinta adenoids  
ka. Sida caadiga ah dhakhaatiirtu isku mar  
ayey sameeyaan qaliinka Quman-goynta iyo  
adenoid-goynta

### Qaliinka kadib

24 saacadood qaliinka kadib, bukaanka  
caloosha ayaa qasanta, waxaana dhici karta  
in uu matago.

Cune xanuun ayaa canuga qaban doona  
ilaa labo usbuuc, taas oo cunto cunidda ku  
adkeyn doonta. Xanuunka cunaha ka haya  
maalmo yar intuu daayo ayuu hadan dib ka  
soo xanuuni doonaa. Canugaaga codkiisa  
wax yar ayuu isbedeli kara qaliinka kadib.

Dhegaha iyo cunaha waxay wadaagaan  
neerfayaasha dareenka. Taas micnaheedu  
waa dhegaha oo xanuuna canuga qaliinka  
kadib waa caadi, gaar ahaan marka ay wax  
laqayaan. Daaman xanuun (xanuun aad  
daremeysa marka aad wax ruugeyso ama  
daamanku dhaqdhaqaqaan) ayaa xitaa  
dhici kara xanuun ayeyna keeni karaan.  
Canugaaga qoorta ayaa xanuuni doonta  
marka qanjirka adenoidka laga gooyo.  
Xanuunadu ilaa usbuuc ayey ku egyihiin.

Neefta afka ilmahaaga ka soo baxda waxay  
noqon doontaa mid ureysa ilaa usbuucyo  
yar. Biyo diiran oo halkii koobba lagu daray  
qaadooyinka yaryar barkeed oo cusbo ah  
ayaad canuga afkiisa ku nadiifin kartaa. Ha  
isticmaalin biyaha aalkolada leh ee afka kagu  
nadiifiyo. Inta ilmuuhu bogsoonayo waxyaalo  
cad oo aad cunaha canuga ku arkeysid waa  
wax caadi ah.

Khuuradu waa caadi qaliinka kadib sababta  
oo ah barar ayaa ku jiro cunaha ilmaha. Laba  
usbuuc kadib ayey khuuradu go'i doontaa.

### Daryeelida canugaaga

Isku day in aad canugaaga siisid biyo  
badan (ugu yaraan labo ama sadex ounce  
saacadiiba). Hadii aad cunaha qoydiid oo  
aanan qalalneyn ilmaha xanuunka ayaa ka  
yaraanaya fuuqbaxana (jirka oo qoyaanku  
ka yaraado) waa ay ka dhowreysaa.

Dehydratation mienihiisu waa jirka ayaa  
engegaya/qalalaya oo ay biyihii ka bexeen.  
Xaaladaas waa xaalad halis ah. Cunugaaga  
ka ilaali calaamadaha fuuqa ama jirka  
engega oo ka midh ah: kaadida oo hoos u  
dacay, marka oohinta ilmada la'aan ama  
afka qalalan/dillac ama/yo sanka.

Dawooyinka xanunka si joogto ah u sii, sidii  
uu canugaaga dhakhtarkiisu kuu tilmaamay.  
Dawada sii marka uu sii seexanayo iyo isla  
marka uu subixii hurdada ka soo tooso.  
Siinta dawo xanuun 30 daqiiqo ka hor  
xiliyada cuntada la cunayo waxay ka caawin  
doontaa ilmaha in ay cunnada u laqaan  
si sahlan. Dawada xanunka ee Tylenol  
isticmaal ama dawooyin kale oo ah xanuun  
ba'biye sido dhakhtarka kuu tilmaamay.  
Weydii dhakhtarkaaga haddii loo ogol yahay  
Ibuprofen.

Qufac, san daarsiga/siimiska, xaakada iyo  
candhuuf tufidda waxay keeeni karaan dhiig.  
Marka loo baahdo, canugaaga sankiisa si  
tartiib ah u tirtir. Marka uu hindhisayo, ku  
guubaabi canuga in uu afka kala qaado si  
uu dhawaaq u sameeyo isla markaana uu  
cadaadis inuu abuurmo uga hortago. Ka  
fogee canugaaga dadka hargabka, iflo-  
weysada ama infakshanka qaba.

*Socda bogga xiga*

## Cabidda iyo cunidda

Maalinta qaliinka la sameeyey, canugaaga waxaa la siin karaa cabitaano cad (la iska dhex arki karo) sida: casiirka tufaaxa, Jello®, Kool-aid®, Popsicles® (Jalaato), biyo caadi ah ama cabitaanada fudud ee koobooyinka ku jira (soodhada) oo inta la qasay laga saaray aashitadii. Waxaa laga yaabaa inaad ilmahaaga loo horumariyo si waxyaabaha caanaha laga sameeyo ama casriyada tufaaxa laga sameeyo (applesauce), uu sii sidoo imahaaga ugu dulqaato sacaado ka dhib.

Hadii canugaagu caloosha qasan tahay, wax-wax yar oo cabitaan ah sii marar badan oo isku xiga. (Hadii uu canugaagu matago isaga oo biyo guduudan cabay kadib, matagu midabka cabitaanka ayuu ahaanayaa.) Cabitaanada iyo cunooyinka guduudan inaad ka fogaato ayaa qumman si aad u xaqijisid in dhiig aanu mataga la socon.

Maalinta koowaad kadib, cunooyinka caanaha laga sameeyo ku kordi fudud ee uu canugu rabo ugu dar waxyaalahaa aad siineysid. Cunooyinkaas waxaa ka mid noqon kara jalaatada (ice cream) ka ah, caano macaan lagu qasay (milk shake), kareemada kastark (pudding) ama yogurt jilicsan. Iska xaqiji ama ku day in canugaagu uu biyo badan cabo. Cabitaanada ayaa ka muhiimsan cunnada xiligan.

Cunno kale oo jilicsan ugu dar (cunno jilicsan waa cunno aan geeso adag lahayn) marka uu canugaagu raboodo. (Shaxda eeg.) Hadii aysan cunno liiska ku jirin, adiga is weydii: Cunadan si fudud ma loo ruugi karaa? Marka la ruugo kadib aad miyey cunadan u sii jilicdaa? Cunnadan ma tahay mid aan geeso adag ama qajajac aan lahayn? Hadii ay jawaabtu haa tahay, qiyas ahaan canugaagu cunadan waa uu cuni kartaa.

Iska hubi inaad cuntada u jarjartid cadad yaryar, isla markaana aad ku guubaabiso canugaaga inuu si fiican u ruugo cuntada. Cuntadii jilicsaneyd siinteeda ku wad hal usbuuc qaliinka sanka hilibka (adenoidectomy) iyo laba usbuuc qaliinka qanjirka.

Ha siin canugaaga furutooyinka/khudaarta cabitaanada miiran ee dhanaanka leh, sida casiirka limo bambeelmada, limo-dhanaant (lemonade). Dhanaankooda cunaha ayuu ka gubi karaa. Ka fogoow cunooyinka basbaaska leh ama kululeylka caadiga ah kulul.

Dawooyinka xanuun jebiska iyo dhaqdhqaqaq la'aanta waxay keenaan caloosha oo fariisato (saxarada oo adkaata.) Ku guubaabi canugaaga in uu cabo cabitaanada aan dhanaaneyn si uu arintaas uga hortago.

## Akhbaar kale oo dheerad ah

Bogsooshadu waxay qaadataa qiyaastii laba usbuuc. Ka caawi canugaaga sidii uu si degan guriga gudihiisa ugu ciyaari lahaa sadex ilaa shan maalmood qaliinka kadib. Canugaagu waa in uusan si aad ah u ciyaarin (jimicsi ama orod) laba ilaa sadex usbuuc. Caruurta waxay sida badan iskuulka ama goobaha xanaanda caruurta ku laabtaan todobo ilaa tobant maalmood kadib.

Hadii canugaagu u baahdo in uu dhakhtar arko, waa in aadan u safrin meel aad u fog qiyaastii laba usbuuc.

Qolfo ayaa ka soo fuqa nabarka 7 ilaa 14 maalmood gudahood, kadibna cunaha ayaa canugaaga xanuuna oo dhiba. Hadii xoogaa yar oo dhiig ah uu yimaado, canugaagu inta uu gadaal u seexdo baraf yaryarna ha dhuuqduhuqo. Madaxa waa inu kor lagu qaado oo wadnaha ka saraayo igu yaraan 30 darajo. Ku guubaabi ilmahaaga in uu nasto. Hadii dhiigu istaagi waayo barafka iyo nasiinada dhakhtarka wac.

Wac dhakhtarkaaga hadii canugaaga aad ku aragto waxyaalahaan:

- Xumada/Qandho ka sareysa 102.5 F
- Dhiig gaduud ifaya ah oo KASTA
- Dhiig ifaya haduu matago (midab basali ah [pink] dareera aan ahayn)
- Sanka oo uu dhiig ka yimaado
- Xanuun aan daawo marka la qaato kaa tegeynin
- Caloosha oo qasan/kacsan iyo matag 24 saac kadib ah
- Calaamadaha fuuqbaxa (dehydration)
- Indhaha oo god gala
- Bishimaha oo qalalan, iskuna dhegaya
- Kaadi la'aan sideed saacadood ka badan
- Ilmo/ooyin la'aan

Socda bogga xiga

<b>Waxyaala la cuni karoeh</b>	<b>Waxyaalaha aan la cuni karin</b>
Rooti jilicisan Waffle dhacaan lagu qooyey ama rootiga islaaska ah oo aan wax la kor saarin (syrup lagu qooyey) Pancake Ukun la qasay ama aan la qasin oo duban	Rootiga islaaska ah oo adag Waffle adag Cunooyin la shiilay
Cereal ka qamadiga ama kuwa budada ah Cereal la qooyey o jilcay(caano lagu qooyey)	Cereal adag oo qaboow
Maraq Baasto caadi ah, baastada dadku gacanta ku sameystaan Baasto makarooni Hilibka hot dog ga, hamburger ka Hilib jilicsan, oo qoyaan leh, hilib digaag/dooro ama malaay/kaluun aan lafo lahayn	Hilib digaag/dooro ama malaay/kaluun adag oo qalalan
Caano Labaniyad, pudding Jalaato (ice cream) Cabitaaanada caanaha iyo waxyaalo kale oo laisku qasay ka sameysan (Malts, shakes) Yogurt (jilicsan) Farmaajada Cottage	Buskut Buskutka adag Pretzels Chips (jibiska adag) Daangada/Saloolka lowska
Rooti wax la dhexgelyey oo geesihiiisu aysan adkeyn Loos shiidan iyo malmalaado Farmaajo la warshadeeyey Tuuunada	Rooti iyo jiis l isku dubay sandwich ah
Khudaar cagaaran oo la kairyey Bataati/baradho la burburiyey/shiiday	Khudaarta cagaaran oo ceyriin ah Yaanyo
Tufaax shiidan Moos Khudaarta/furutada koobooyinka ku jirta Qare aan lafo lahayn	Khudaarta dhanaan Khudaarta/furutada fareeshka ah badidooda
Cabitaaanada casiirka ah (aan dhanaaneyn) Kool-aid® Cabitaaanada fudud (soodhooyinka ) aan aashitada lahayn Jell-O®	Cabitaaanada dhanaan Cabitaaanada fudud (soodhooyinka ) aashitada leh

Macluumaadkan waxa loo istiamaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad. Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.